

SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO 1064

THE II EPISTLE OF APOSTLE

PETER 1:1-7

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu caaway horey idiinku sii wadaynaa warqaddii labaad ee rasuul Butros oo aynu idiinku bilownay barnaamijki kan inooga horreeyey. Waxaanan idiin dul marnay warqaddan doodaha ka taagan iyo weliba mawduuca rasuul Butros warqaddan uu ku adkaynayo.

Waxaana mawduuca guud ee warqaddan labaad laynoogu soo koobay cutubka 3:18, baalka 415 ee kitaabka Axdiga Cusub. Waxaana rasuulku, isagoo soo koobaya dulucda guud ee warqaddan labaad uu leeyahay sidatan: **"Laakiinse ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix, Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeedba Aamiin."**

SONG: REEL-----CUT-----

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay meeriska cutubkii kowaad ee Warqaddii labaad ee rasuul Butros. Waxaanan idiin kala dhigaynay tafsiirka aayaddii kowaad ee Warqaddii labaad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

"Anigoo ah Simoon Butros, oo addoon iyo rasuulba u ah Ciise Masiix, waxaan warqaddan u qorayaa kuwa helay iimaan qaali ah oo keenna la mid ah, oo ku helay xaqnimada Ilaaheenna iyo Badbaadiyeheenna Ciise Masiix."

Haddaba su'aashu waxay noqonaysaa sidee bay iimaanka ku heleen, waxay iimaanka ku heleen, haddaan idiinka jawaabo, **"Xaqnimada Ilaaheenna iyo Badbaadiyeheenna Ciise Masiix."**

Haddaba innagoo horraan u ahayn dembiileyaal ayaa layna cafiyey, oo oodda laynaga soo qaaday; waxaanan meel aynu Ilaah kaga hor muuqanno laynoogu sameeyey masiixa, waana marka aynu Masiixa ku jirno, oo aynu aqbalno kan la jecel yahay.

Waxaannu caaway meeriska idiinka bilaabaynaa haddaba aayadda labaad ee Warqaddan labaad ee rasuul Butros, baalka 411 ee Axdiga Cusub. Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Nimco iyo nabadu ha dinku bateen xagga aqoonta ilaah iyo Rabbigeenna Ciise."

Marka uu leeyahay nimco iyo nabadu haydiin bateen, ayaannu garanaynaa in nimcada io nabaddu ayan kala harin, waxaana horreeya Nimcada. Haddaynaan nimco helin, nabadijiri mayso.

Marka hore waa inanu garanayno nimcada Ilaah--ee ah in Ilaah ina badbaadiyey, laynagumana badbaadin

ficilladeenna, ama shakhsiyaddeenna, ama wax wanaagsan oo inagu jira aawadeed, laakiin waxaa laynagu badbaadiyey rumaysadka aynu ku qabno ama leennahay Ciise Masiix. Masiixu wuxuu ina jecclaa jacayl dhan oo keenay inuu innaga inoogu dhinto isku tallaabta si uu u bixiyo ciqaabtii dembiya-deenna. Oo welibana isaga waa u suuragal inuu inoogu yimaado moolka dheer ee aynu ku tiimbannay. Markaa waxaan kuu sheegayaa saaxiib in Ilaah dadka uu ku badbaadiyo nimco, oo wuxuu kuugu badbaadinayaa markii aad Masiixa ku kalsoonaato, iyadoo wax ficil ah aan lagaaga baahnayn. Markiise aynu helno nimcada Ilaah oo aragno wanaaggeeda, ayaannu dareemaynaa nabadda Ilaah.

Bawlosna taas ayuu inagala hadalayaa marka uu leeyahay sida ku qoran Warqad-diisii reer Rooma 5:1, baalka 273 ee Axdiga Cusub. Waxaana rasuulku leeyahay sidatan: **"Sidaas daraaddeed innagoo xaq laynagaga dhigay rumaysad, nabad baynu xagga Ilaah ku haysannaa Rabbigeenna Ciise Masiix."** Mar kale ayaan idiin sheegayaa in Simoon Buros aan loo qaadan karin nin jaahil ah sidii beryihii hore uu ahaa. Waa intii aan Masiixa la gacangelin. Waxaannu ku soo aragnay warqaddiisii ugu horraysa ama kowaad in rasuul Butros ka hadlayo ama xoogga saarayo waxbarid ka xoog badan tan qorayaasha kale ee kitaabka Axdiga Cusub ay ka hadleen. Wuxuu warqaddii kowaad ku soo qaatay waxbaridda qaar, kuwaasoo laysku maan dhaafsan yahay.

Wuxuuna uga hadalyaa si cajiib ah, oo aad garanayso in Ruuxa Ilaah ka dul hadlayo isaga. Isagu waa qoraha kitaabka Axdiga Cusub oo isticmaalaya xisaab. Wuxuu

leeyahay **"nimco iyo nabadu ha idiin badato."** Waxaan xusuusan nahay in Bawlos markay nimcada iyo nabadda joogto aanu u hadli sdia Butros oo isagu arrinkiiba xisaab u rogay.

Bawlso wuxuu yiri, Ilaah wuuu hodan ka ayahay nimco iyo nabad dhaafsiisan garashada dadka. Butrosna wuxuu ka hadlayaa siyaado, oo wuxuu yiri, **"Nabad iyo nimco ha idiin korodho."** Haddaba siyaadada la sheegay sidee baynu ku helaynaa, xaggee bayse ka imanaysaa? Haddaan rasul Butros ku noqonno ayaa waxaa uu leeyahay, **"Kororsiimada ama siyaadada nimcada iyo nabadda waxay ku bataan xagga aqoonta Ilaah iyo Rabbigeenna Ciise Masiix."** Miyaanay taas hubaal ahayn saaxiibkayga masiixiga ahow.

Bal aynu haddaba ka yara munaaqishoonno erayga aqoon, waayo isla eraygaas ayaa ku soo noqnoqonaya warqaddan, waayo iyadoo ay ugu wacan tahay ahmiyadda. Waxaa kaloo erayga "aqoon" inoo adkeeyey rasul Bawlos sida ku qoran Warqadd-iisii reer Filiboy 3:10, wuxuuna rasul Bawlos leeyahay sidatan soo socota: **".....Inaan ogaado isaga iyo xoogga sarakiciddiisa iyo wada-wadaagidda xanuunsigiisa, anigoo isaga xagga dhimashadiisa ugu ekaanaya."** Marka uu leeyahay inaan ogaado ayaa loo jeedaa inaan aqoodo. Waxaa kaloo erayga aqoon ka hadlay nebi Daanyeel sida ku qoran kitaabka ku magacaaban 11:32, markaasoo nebigu leeyahay:

"..... laakiinse dadka Ilaahooda yaqaan way xoog badnaan doonaan, oo waxyaalo waaweyn bay samayn doonaan." Waxaan markaas saaxiib kuu sheegayaa inaad waxba Ilaah u samayn karin haddaadan Masiixa aad iyo aad u garanaynin. Sidee bay kuugu tmaaddaa

aqoontaas iyada ah? Haddaba markii aynu warqaddan dhamaystirno, ayaad ogaan doontaa in aqoonta Masiia ay ku timaadda garashada Hadallada Ilaah.

Haddaba garashada iyo aqoontu labo ayey kala yihiin. Waxaa laga yaabaa in qofi kuugu yiraahdo miyaad garanaysaa madax-weyhihii hore ee Soomaalida oo la oran jiray Cabdi-Rashiid? Waxaa laga yaabaa inaad maqashay madax-weynahaas isaga ah, laakiin aadan waxba ka ogayn afkaartiisii, iyo sidii uu u wanaagsanaa iyo wadaninimadiisa.

Isla sidoo kale Ciise Masiix dhegta ayaa ka maqashay, waxaanad ka taqaan inta dadka kale ay kaaga sheegeen. Su'aashu waxay tahay, **"Maxaad ka taqaannaa Masiixa?"** Adiga qudhaadu miyaad akhrisay Hadallada Masiixa? Miyaad og tahay inuu yiri, **"Ii kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaydan oo culaabaysanow, oo anigu waxaan idin siin doonaa nasasho?"**

Haddaba waxaan idinku boorinayaa inaydaan dhegaysanin wax qof kale kaaga sheego Masiixa. Adiga qudhaadu baro wax ku saabsan Masiixa, oo eeg sida uu yahay. Haddii aynu doonayno inaan Masiixa u garanno sida uu yahay, waa inaynu markaa mar labaad dhalannaa, oo rasuul Butros wuxuu leeyahay sida ku qoran warqaddiisii kowaad 1:23, markaasoo uu lahaa: **"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur-baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baabaayn oo ah erayga Ilaah oo nool oo waara."** Haddaba markii aynu ka dhalanno erayga Ilaah oo waara, markaas ayaa wax waliba is-qabsanayaan, oo wax walibana ay dhismayaan---waana marka aasaasku yahay Hadalka Ilaah ee nool ee waara.

Weli waxaannu bartamaha uga jirnaa dhegaystayaal Warqaddii labaad ee rasuul Butros cutubkiisa kowaad, waxaanan imminka isla eegaynaa aayadda 3aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Maxaa yeelay, Ilaah xooggiisu wuxuu ina siiyey wax kasta oo ku saabsan nolosha iyo cibaadadaba, oo wuxuu inagu siiyey aqoonta kan inoogu yeedhay ammaantiisa iyo wanaaggiisa."

Haddaba awoodda rabbaaniga ah ee layna siiyey innaga oo dhan ee aynu ugu baahan nahay inaan ku noolaanno nolol taam ah oo masiixinnimo waxaa weeye in Ciise Masiix laysku dhiibo. Waxyaabaha suurageliya nolosha masiixinnimada ahna waa xooggiisa uu ina siiyey. Waxaa lagu helaa nolosha masiixinnimada ee cibaadada suuban leh, xooga Masiixa, haddii kale waxba kuu hirgali maayaan saaxiib.

Marka uu leeyahay, **"..oo wuxuu ina siiyey aqoonta kan inoogu yeedhay ammaantiisa iyo wanaaggiisa, "**ayaannu mar kale arkaynaa erayga aqoon. Waana aqoonta Masiixa tan aad ku baran krto nolosha aad halkan ugu noolaanayso, oo aad ku noqonayso qof cibaado leh. Tan keliya ee aad ku noqon karto qof shakhsiyaddiisu sarayso waxaa weeye inaad Masiixa aqoonsato.

Oo marka uu leeyahay, **"...noogu yeedhay ammaantiisa,"** ayaa taas ka dhigan tahay in laynaga doonayo inaynu yeelanno dabiicad matali karta tii Maiixa. Waxaa kaloo uu leeyahay wanaaggiisa, waa wanaagga Masiixa oo ah waxyaabo innagu aynaan qiyaasi karin, oo fikirkeenna ka weyn. Waxaanan wayxaabahaas oo dhan helaynaa haddii aynu isku dhiibno Masiixa.

Wanaaggeennu wuxuu noqon karaa inaan yeelanno go'aan iyo aragti aynu ku raacayno dadka aynu wax wada aaminsan nahay. Markaa maahan saaxiib inaynu dadka go'aammadooda isaga raacno xitaa haddii ay innaga ina wiiqayaan, waa inaan caddayno fikirkeenna marka ay joogto go'aan qaadashada. Maahan marka aad Masiixi tahay inaad noqoto nin go'aan jilicsan, oo wax waliba dadka ku raaca ama ayida.

Waxaa la doonayaa haddii aad masiixi tahay inaad labadaada lugood isku taagto oo aadan noqon sida nin mar waliba u baahan in la sido ama qof isku taaga. Haddaba wakhtigan aynu nool nahay sida keliya ee aynu dhibaatooyinka uga gudbi karno ama aynu ku helayno wanaagga ayaa waxay tahay garashada ama aqoonta Masiixa, Waana qaacidada ama formalaha rasuul Butros ina siinayo marka uu leeyahay, "...oo **wuxuu inagu siiyey aqoonta kan inoogu yeedhay ammaantiisa iyo wanaaggiisa.**"

Haddaan dib ugu noqonno meerisak xutubka kowaad ee warqaddan labaad eer asuul Bturos ayaannu haatan idiin ahriyeynaa dhegaystaaal 1:4, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Wuxuu kuwaas inagu siiyey ballammadiisa qaaliga ah oo aad iyo aad u waaweyn, inaad kuwaas ku noqotaan kuwo ka qayb qaata dabiicadda Ilaah, idinkoo ka baxsaday kharribaadda dunida ku jirta ee ku timid damaca jidhka." Imminka simoon Butros wuxuu ballammadii ugu yeerayaa kuwo qaali ah.

Aayaddii kowaad wuxuu inoo sheegay rumaysad qaali ah, waa kan masiiyiinta e; imminkana wuxuu inoo sheegayaa in ballammadu ay qaali yihiin, kuwaasoo

innaga layna siiyey, ama laynoo soo gudbiyey. Haddaba ballamaadaasu waa qaali marka la eego waxa Masiixu inoogu sheegayo Injiilka sida Matayos u qoray 11:28, markaasoo uu lahaa:

"..Ii kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaab-aysanow." Waxaa kaloo ballamadaas caaqibada leh ka mid ah marka Masiixu leeyahay, **"Anigu dib u celin maayo qof waliba ee ii yimaada."** Waxaa kaloo ballammada ka mid ah sida ku qoran Injiilka sida Yooxaaa u qoray 14:6, markaasoo Yooxanaa uu lahaa: **"Kan wiilka haystaa noloshuu leeyaay...."**

Waxaa kaloo rasuul Yooxanaa leeyahay, sida ku qoran warqaddiisii kowaad 5:12, waxaana qorniinku leeyahays idatan: **"Kan wiilka haystaa, noloshuu leeyahay, Kii aan wiilka Ilaah naysanna nolosha ma leh."** Rasuul Butros ayaa isna ballan caaqibo leh inagu siinaya warqaddiisii kowaad 1:23, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah erayga Ilaah oo nool oo waara."

Miyaanay ballammadaas ood han ahayn kuwa qalbi-qaboojin siinaya dadka oo dhan, waa inta u soo leexata Ciise Masiix e. Waxaa ballamadaas oo dhan lagu helayaa garashada ama aqoonta Ciise Masiix iyo in isaga lagu aqbalo rumaysad. Weli waxaannu ku jirnaa tafsiirka warqaddii labad ee rasuul Bturso aayadda 4aad ee cutubkan kowaad. Marka uu leeyahay, **"Inaad kuwaas ku noqotaan kuwo ka qayb qaata dabiicadda Ilaah, idinkoo ka baxsaday kharribaadda dunida ku jirta ee ku timid damaca jidhka,"** ayaa taasuu noqonaysaa warbixin kulul.

Wax yar kaddib Butros wuxuu ka hadlayaa rumaystayaasha ka baxsaday in dunida ay ku nijaasoobaan. Haddaba waxaa jira isbeddel u dhexeeya nijaasnimada iyo musuqmaasuqa dunida. Musuqmaasuqu waa wax inagu jira. Nijaasnimadana waa wax dusha ah. Waxaad haddaba dunideenna ka maqlaysaa dadka oo ka hadlaya in saxadii wanaagsanayd la halleeyey, oo haddii la nadiifiyo deegaanka ay dadku wanaagsanaanayaan oo caafimaadkooduna sare u kacayo. Waa run taas, laakiin haddana mar waliba nijaasnimadu way jiraysaa. Nijaasnimada haddaan hal iyo laba kaaga sheego ayaa waxay tahay in qofku khamriya-cab noqdo oo uu ku daydo dad iyaguna aalkulaystayaal ah.

Waxaa kaloo ka mid ah in qayb laga noqdo akhyaar iyaguna caadaysay inay jabbaneeyaan saacad waliba. Waxaa kaloo ka mid ah sinada noocay ahaataba. Waxyaabahaas waa waxyaabo damiir xumo ah oo qofka u keenaya nijaasnimo iyo karaahiyannimo. Haddii markaas aad doonayso inaad ka baxsato dhegayste kharribnaanta dunida taalla waa in dabiicad cusub aad la timaaddo, tii horena aad iska dhigtaan ama ka tanaasushaan saaxiib.

Mar waliba waxaa qofka masiixiga ah ka dhex soconaya dagaal u dhexeeya dabiicaddii hore iyo tan cuub. Waxaana masaal arrinkaas isaga ah la xiriira laynagu siiyey Injiilka sida Luukos u qoray 15:11-32. Waxaa masaalka laynoogu sheegayaa in wiil dhallinyaro ah uu aabbihiis ka qaatay dhaxalkiisii oo uu u safray dhul dheer, oo wuxuu lacagtiisii ku dhammeeyey khamri iyo caways. Ugu dambaystiina wuxuu noqday xubeero, oo waxaa shaqo laga siiyey goobo

doofaarrada lagu dhaqaaleeyo. Waxaa sida abbaarta ah wiilkaas aabbihii uu ahaa nin aan jecelayn in lacagta lagu ciyaaro, oo aan ilmihiisa u oggolayn inay dalxiis ama tamashle aadaan.

Wuxuu rumaysnaa in reerku helo wax waliba ee ay u baahan yihiin iyo inay nolo wanaagsan ku noolaadaan. Waxaana guriga reerka ku badnaa cunno cayn waliba ah oo uu qof waliba heli karo. Balse markii uu arkay nolosha ka dambaysa tumashada ee ah fakhriga ayuu bilaabay inuu maskaxda ka shaqaysiiyo oo wuxuu yiri, **"Anigu waan kici, oo waxan u tegayaa Aabbahay."**

Marka uu sidaas leeyahay, dabiicaddiisii hore ee ridday ayuu la dagaallamayaa, oo wuxuu doonayaa inuu dabiicad cusub ku socdo. Waayo Aabbihii ka aqbali maayo inuu bannaanka iska warwareego, oo uu cawaysyada ka qayb galo, oo uu ahlu balwad noqdo. Waxaa kaloo rasuul Butros inagu siinayaa warqaddiian labaad 2:22 masaal khuseeya kuwa aan dabiicadda cusub ku socon karin iyo sida damiirkoodu yahay.

Wuxuu leeyahay, "Doofaaraddii mayrataa, waxay dib ugu noqotaa gelgelintii dhoobada." Markaa kuwa wasakhda ah ama nijaasta ah ee afka ka sheegta inay masiixiyiin yihiin, waxay haddana ku noqonayaan gelgelintii dhoobada ahayd oo innaba ku farxi maayo daahirnimada. Soomaaliduna waxay tiraahdaa **"Doofaar ma daahiro."** Kuwa masiixiyiinta isku sheegaya balse aan ahayn ayaa ugu dambaysta waxay dib ugu noqdaan noloshoodii hore. Qofkii masiixi ah, oo ka mid ah kuwa Ilaah, mar waliba wuxuu qaadanayaa dabiicadda Aabbaha. Haddaba inkastoo mararka qaarkood uu ku jiro qofku balwado xun xun iyo nolol

aan hagaagsanayn, haddana wuxuu ugu dambaysta ku dambaynayaa Aabbaha isla sidii wiilkii wixiisii khasaariyeyba Aabbihii ugu noqday.

Dadka qaarkii baa si kale u qaada kara Hadallada rasuul Butros, marka uu leeyahay, **"inaad kuwaas ku noqotaan kuwo ka qayb qaata dabiicadda Ilaah."** Waxay la noqonaysaa inuu wax ku darayo badbaadada Masiixa, balse sidaas u hadli maayo, wuxuuse leeyahay markii aad badbaaddaan waxaa la doonayaa in laydinka dhex arko kororsiimo dhanka rumaysadka ah.

Maahan inaad afka ka sheegato rumaysad, oo haddana aad qaad ama khamri ka wabaxdo. Waa in rumaysadka Masiixa iyo garashadiisa ay kaa beddesho dadka aan Ilaah waxba ka garanaynin. Maahan inaad sii wadato noloshee hore ee dulliga ahady iyo dabiicaddii qallafsanayd ee fallaagannimada. Waxaa loo baahan yahay saaxiib in noloshaada masiixinnimo ay masaal u noqoto kuwo badan, oo adiga awgaa ay Masiixa u yimaadaan.

Rasuul Yooxanaa oo masiixiyiinta la talinaya ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddiisii kowaad 3:2, oo leh: **"Gacaliyayaalow, imminka waxaynu nahay carruurta Ilaah; oo weli waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay in gooortuu muuqdo aynu noqon doonno sidiisa oo kale, waayo, waynu arki doonaa isaga siduu yahay."**

Haddaba waxaa halkaas ku cad inaynaan weli, waa haddii aynu masiixyiin nahay, e aynaan heerkaas gaarin balse aynu gaari doonno. Isla sida rasuul Yooxanaa ayaa rasuul Butrosna wuxuu inagala hadlayaa koritaanka masiixinnimo ee walaalaha, wuxuuna iangu leeyahay: **"Walaalayaalow aynu**

nimaadno meel rumaysadkeennu ku kori karo."
Haddaannu dhegaystayaal horey idiinku sii wadno
meeriska ayaannu imminka idiin akhriyeynaa
Warqaddii labaad ee rasuul Butros 1:5-7. Waxaana
qorniinku leeyahay sidatan:

**"Sababtaas daraaddeed idinkuna aad u dadaala, oo
rumaysadkiinna waxaad ku dartaan wanaag,
wanaaggiinnana aqoon, aqoontiinnana iscelin,
iscelintiinnana dulqaadasho, dulqaadashadiinnana
cibaado, cibaadadiinnana kalgacayl walaalnimo,
kalgacaylkiinna walaalnimana jacayl."**

Waxaa rasuul Butros leeyahay, **"Sababtaas daraaddiin
idinkuna aad u dadaala."**

Haddaba nolosha masiixinnimadu waa hawl aan ciyaar
ahayn, oo qofku uu gucla-roor u gelayo sidii uu ku
gaari lahaa nolol masiixinnimo oo Ilaah ka farxisa,
dadka qofka uu la nool yahayna wax u tarta. Maahan
inaad noqoto nin luguhu isku saara yihiin, oo wax
ku hela inuu Masiixi yahay aawadeed.

Markaana Ilaah ka dalbanaya masiixinnimadiisa
awgeed. Nolosha masiixinnimadu waa nolol farxadeed,
haddii qofku gaaro heer dhibaatooyinka uusan ka
qoomamayn laakiin uu ku farxayo. Wuxuu qofka
masiixiga ah ee gaamuray leeyahay dareenka ah in wax
waliba ay dhammaad leeyihiin.

Miyaanay wax waliba dhammaad lahayn saaxiib.
Nolosha banii-aadanka qudheeda ayaa dhammaad leh,
maxay kula tahay haddaba dhibaatooyinka nolosha?
Iyaguna dhammaad bay leeyihiin, markaa waxaad
ogaanaysaa inaad ku qoran tahay looxa derajada,
marba haddaad Masiixi tahay, oo waxaa micigaaga ah,
Masiixii sara-kacay. Haddaan intaas ku soo

dhammayno waxbariddeennii caaway, ayaan ku calool-fiyoobahay inaad wax badan ka faa'iidaystaanaysaan barnaamijka.

SONG: REEL---CUT-----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin